Somali 2009
Multi-drug Resistant
Tuberculosis (MDR TB)

Haddaad TB qabto oo aad rabtid inaad wax ka ogaatid qof hore cudurka u qabay, waxaad ka heli buuga The Tuberculosis Survival Handbook (buuga badbaadada TBda) oo uu qoray Paul Mayho (soo saarista labaad). Buuga waxa la siiyaa £14.95 waxaana laga helaa dukaamada buugaagta ee xaafadda, adeega buugta Gazelle iyo www.amazon.co.uk ama toos ula xidhiidh madbacadaha, websaytka Merit Publishing International www.meritpublishing.com ama email merituk@aol.com. Lambarka tixraaca ee aad buuga ku dalbaneysid waa ISBN 1 873413 14 9.

Xasus:



Ka badbaadi TBda qoyskaaga iyo saaxiibadaa – qaado dawada TBda

**Ogsoonow** intaad dawada qaadaneysid waxa talo iyo caawimo kuula joga kalkaaliyaha. Fadlan la xidhiidh kalkaaliyaha TB haddaad dareentid xanuun ama aad wax ka garanweydo dawooyinka aad qaadaneysid.

Kalkaalyahaaga TBdu waa:

Dhakhtarkaaga cisbitaalku waa:

Kala xiriir:

Email:

**TB Alert** waa hay'adda kaliya ee samafal kuna taal UK ee kor u qaada ogaalka qaaxada aduunweynaha kuna caawisa NHSta iney warbixin siiso bukaanka. Waanu taageernaa mashaariicda hubinaysa iney dadka buka ee wadamada soo korayaa heleen daawyn iyo wacyigelin saxa. Hadaad na taageerto saamayn la taaban karo ayaanu u geysaneynaa TBda aduun weynaha dad badana wuu badbaadi.

**TB Alert**,
Community Base,
113 Queens Road,
Brighton BN1 3XG
Tel: 01273 234030

Wixii warbixin dheeraada ah iyo nuqulka warqaddan, fadlan kala xiriir 01273 234 770 (xiliga shaqada oo kaliya).

Sii aad deeq ama iska-wax-u-qabso u tartid TB Alert,fadlan kala xiriirt 01273 234 784 (xiliga shaqada oo kaliya).

Ama gal websaytkayaga www.tbalert.org

Warbixinta warqaddan ku qoran ee ku saabsan baadhitaanka iyo daaweynta Qaaxada waxa loola jeedaa warbixin guud uun, loolama jeedo iney kuu bedesho aqoontii iyo xirfaddii iyo go'aamintii ay lahaayeen dhakhaatiirtu, farmasiilayaasha iyo/ama aqooyahanada kale ee daryeelka caafimaadka ee daryeela bukaanka. Warbixin kaliya oo warqaddan ku qoran looguma talo gelin go'aaminta baadhista ama daaweynta. Su'aalaha iyo wixii khuseeya ee ku saabsan baadhista iyo daaweynta waa in loo gudbiyaa aqoonyahanada daryeelka caafimaadka.

Shaqada horumarka aasaasiga ah ee Shabakedda North London TB

A company limited by guarantee Registered in England No. 3606528 Registered Charity No. 1071886 design: worksong, london 020 8352 8300

WARBIXINTA DADKA BUKA

Stop Tuberculosis Worldwide

# Qaaxada dawooyinka u adkeysata (MDR TB)




NHS

Somali_52042 MultiDrug TB.indd 1 10/06/2009 11:50

## Waa maxay qaaxadu (TB)?

Qaaxadu (TB) waa baakteeriya infekshan ah oo badanaa laga helo sanbabada qayb kasta oo jidhka ka mid ahna ku dhici karta sida maskaxda, qanjidhada miskaha, kelyaha iyo lafaha.

## Sidee loo qaadaa qaaxada?

Marka uu qufaco ama uu hindhiso qof qaba qaaxada sanbabada ama cunahu wuxuu hawada ku siidaayaa jeermis kaas ayuu daka kalana neefsadaan oo qaataan. Dadka badanaa qaadaa waa kuwa kula nool guri ama falaat qof kale oo qaba TB.

## Waxa igu dhacay ifekshan?

Dadka TBda qaba oo dhan infekshan ma qabaan, ifagshanka waxaad qabtaa oo kaliaya marka ay kugu dhacdo TBda cunaha iyo sanbabada oo aad jeremiska TBda qufacdid (tan waxa la yidhaahdaa smear positive) Dadka kale dhib kuma haysid haddii meel kale oo jidhka ka mid ah TBdu kaa hayso oo aan ahayn sanbabada iyo cunaha. Dhakhtarkaaga./ kalkaaliyaha ayaa warbixin dheeraada ku siin kara.

## Waa maxay qaaxada dawooyinka badan u adkeysataa (MDR TB)

TBda MDR waxay soo baxdaa marka jeermiska TBdu u adkeysto labada dawo ee ugu xoogweyn ee badanaa loo qaato TBda. Taas macnaheedu waxa weeye dawooyinkan dib uma shaqaynayaan mar hadaaney jeermiska TBda dileynin.

## Goormaad uga shakiyi kartaa in qof qabo MDR TB?

Muunadda jeermiska TBda ayaa shaybaadhka lageynayaa si loo eego in lagu dilo dawo kale. Haddi ay maya tahay, markaa waa in loo daayaa qofka buka dawadaa uu qaadanayo ee TBda,waxa loo soo jeedinayaa iney taasi tahay MDR TB.

## Dadku maxay u qaadaan MBR TB?

1. TBdu waxay noqoneysaa mid adkeysan leh si kastaba ha ahaatee haddii dawada loo qaataa ay ku filaan weydo, tusaale:
   - Haddaanu qofku dawada joogto uqaadanin sida loo soo qoray ama aanu dhamaysanin door kaamil ah oo daaweyn ah joogto
   - Hadduu qofka bukaa liqi kariwaayo dawada, tusaale hunqaaco awgeed
   - Haddii aan dawadii saxa ahayn aan la soo siinin.
   - Hadday dawadu tayo xuntahay
2. TBdu waxay noqon kartaa marka horeba mid adkeysi leh waayo qofka buka ayaa dawada adkeysi u leh.

TBda MDR kama xuma TBda kale ee caadiga ah ee dawooyinkeeda ayaa wax-tar yar oo muddo dheerna la qaataa. Markaa qofka qaba TBda MDR in badan ayuu haynayaa xanuunku oo ka badan qofka kale ee TBda qaba ee dawooyinka caadiga ah ee TBda u nugul (drug sensitive TB).

## Maxay mushkulad u tahay TBda MDR?

TBda MDR kama xuma TBda dawada u nugul ee waxa adag sida loo daweeyo.

Dawada lagu isticmaalo TBda dawada adkeysanka u leh waxay keenaan dhibaato kale (side effects) waanay ka tayo yaryihiin dawooyinka loo isticmaalo TBda dawada u nugul. Taas macnaheedu waxa weeye qofka qaba TBda MDR wuxuu u baahanyahay daaweyn muddo ah waanu bukayaa intaas. Weliba wey u dhowdahay in cisbitaalka la dhigo.

## Intee inle'eg baan bukayaa?

Waxay ku xidhantahay sidey wax kuugu taraan dawooyinka aad qaadatid. Kiisaska TBda MDRna way kala duwanyihiin.

Muddo ayaad bukeysaa wiigag ama bilo waayo TBda ayaa u adkeysata dawada caadiga ah.

## Intee in le'eg baan u baahnay inaan dawada qaato?

Doorka daawynta TBda dawada u nuguli wuxuu qaataa ugu yaraan 6 bilood. Daaweynta TBa MDR wuxuu qaataa 18 bilood ama ka badan.